



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

Xusuusinno iyo Cusbooneysiinno ka socda Waaxda Gaadiidka ee PPS

13 ka Abriil, 2021

Qoysaska PPS ee Sharafta Leh,

Inta aanu u diyaargarobayno in aanu ku celino ardaydayada dugsiyada dhexe iyo sare dhismayaasha, Waaxda Gaadiidka PPS waxa ay jeclaan lahayd inay baahiso waxoogaa xusuusinno iyo cusboonaysiinno ah si ay gacan uga gaysato in si amaan ah ardaygaaga loogu celiyo dugsiga wakhtiga loo qoondeeyey haddii ay raacayaan bas si ay uga qaybqaataan waxbarashada fool ka foolka ah ee isku-dhafka ah.

Macluumaadka waddada baska iyo goob-joogsiga baska ee loogu talagalay ardayda ku jirta fasallada 6-12 waxa laga heli doonaa [websaytka Gaadiidka PPS](#) marka ay taariikhdu tahay ama se kahor 14 ka Abriil.

Si loo xaddido suuragalnimada u baylihitaanka COVID loona yareeyo tirada ardayda ee fuulaysa basaska PPS, waxa aanu ka dalbanaynaa waalidiinta/masuullada, marka ay suuragal tahay, inay qaadaan ama lugaysiiyaan ardaydooda marka ay tagayaan ama kasoo noqonayaan dugsiga. Si aad loogu sii yareeyo cidhiidhiga dugsiyada, waxa aanu ka dalbanaynaa waalidiinta ardayda waaweyn inay dhigaan ardaygooda meel laba sekadood ka durugsan dugsiga una ogolaadaan ardaygu in uu halkaas si amaan ah uga soo lugeeyo illaa dugsiga.

Taas waxa dheer, fadlan ka eeg [Liiskan Hubinta ee Isbaadhitaanka ee Maalinwalba](#) calaamadaha, wargelinta iyo shuruudaha joogitaanka guriga kahor inta aanad u ogolaan ardaygaaga in uu baska fuulo.

Tilmaamaha Ugu Socdaalka iyo Kaga Socdaalka Basaska Waxbarashada Fool ka Foolka ah ee Isku-Dhafka ah:

- Marka lagu socdaalayo bas, ardayda waxa la fari doonaa inay xidhaan weji gashi iyada oo naafanimo ardayga haysaa ay u ogolaan weydo inuu sidaa sameeyo mooyee.
- Cunidda cuntada iyo sharaabka lama ogola inta baska la saaran yahay.
- Daaqado cayiman oo halka hore iyo halka dambe ah ayaa la furi doonaa si loo dardargeliyo qulqulka hawada iyo hawo qaadashada ugu wanaagsan. Basasku sidoo kale waxa ay ku qalabaysan yihiin nidaamyada shaandheynta hawada ee HEPA si ay meesha uga saaraan walxaha hawada ku dhex jira.
- Ardaydu waxa ay baska u fuuli doonaan iyaga oo buuxinaya safafka dambe marka hore. Waxa ay uga degi doonaan iyaga oo safafka hore kasoo degaya marka hore illaa safafka dambe la gaadho si loo ilaaliyo kala fogaanta jidheed.
- Ardayda waxa laga dalban doonaa in ardaygiiba uu kursi ku fadhiisto. Si loo ballaadihiyo booska,

walaalaha waxa laga dalban karaa inay wada fadhiistaan.

- Basaska waa la nadiifin doonaa waddo kasta kadib iyo markale oo ah dhammaadka maalin dugsiyeedka.
- Haddii ardaygaagu ku jiro dugsiiga sare oo uu raaco Trimet, Tigidhkooda Raacitaanku “Hop Pass” imika ahaan waa uu shaqaynayaa sidaasna waa uu ahaan doonaa illaa la gaadho dhammaadka sanad dugsiyeedka.

PPS waxay talaabooyin taxaddar amaan ah u qaaday ardaydeena iyada oo la raacayo qaabka Habraacyada Hawlgalka Caadiga ah ee soo socda (SOP's): [Baadhitaanka Baska/Gelitaanka Dugsiga](#), [Nadiifi oo Jeermiska Ka Dil Baabuurta](#), [Fuulitaanka/Ka Degitaanka Baska](#).

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo [websaytka Gaadiidka PPS](#). Sidoo kale waxa aad si toos ah noogala soo xidhiidhi kartaa iimaylka ah transportation@pps.net ama taleefanka ah 503-916-6901. Waxa aanu sidoo kale aburnay muuqaal gaaban oo soo bandhigi doona khibrada maalinlaha ah ee laga filayo ardaygaaga oo aad [halkan ka eegi](#) karto.

Mahadsanid.